IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 9aad Muqdisho 1 Okt. 1981 L. 10

FAAHFAAHINTA BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J. D. S.

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sannadii waa Sh. 100 Somaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Jenayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoriitaanka waxaa la weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda lacagta

## KOOBNIIN

### SHARCI

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI L. 52 ee 11 Luulyo 1981, Oggolaansho dhaqangelinta Heshiis dhexmaray JDS iyo Dawladda Jam. Jabuuti. BOG. 1479

SHARCI L. 52 ee 26 Luulyo 1981, Meelmarin Heshiis. » 1481

القانون رقم ٥٢ الصادر فى ٢٦ ــ ٧ ــ ١٩٨١م اتفاقية تبادل المجرمين المبرمة بين حكومة جمهورية الصومال وجيبوتى ، ١٤٨٢

SHARCI L. 53 ee 15 Luulyo 1981, Oggolaansho Heshiis dhexmaray JDS iyo dhowr Banki iyo Shirkadda Teehnipetrol, saameeyana amaah lacageed iyo dhismo Warshadda Bacrinta Beeraha. » 1482

SHARCI L. 53 ee 26 Luulyo 1981, Meel Marin Heshiis. 1485

LAW N. 53 on 26th July 1981, Instrument of Ratification. » 1487

SHARCI L. 54 ee 15 Luulyo 1981, Oggolaansho dhaqangelinta Heshiis Saaxibnimo iyo wax wada qabsi oo dhexmaray JDS iyo Daw. Jam. Jabuuti. » 1488

SHARCI L. 54 ee 26 Luulyo 1981, Meel Marin Heshiis. » 1490

القانون رقم ٥٤ الصادر فى ٢٦ — ٧ — ١٩٨١م ١٤٩١
معاهدة الصداقة والتعاون المبرمة بين جمهورية الصومال وجيبوتى

SHARCI L. 55 ee 18 Agoosto 1981, Oggolaansho Axdiga iyo ka mid noqoshada Hay'adda Damaanadda Maalgelinta Carbeed. » 1492

SHARCI L. 55 ee 6 Sebt. 1981, Meel Marin Heshiis. » 1493

القانون رقم ٥٥ الصادر فى ٦ — ٩ — ١٩٨١م ١٤٩٤

SHARCI L. 56 ee 27 Agoosto 1981, U Rogid Sharci Xeer Sharciga L. 46 ee 30 Juunyo 1981, kuna saabsan dib u habaynta Qaabka dhismaha Tariifada Furdada iyo wax ku kordhinta C. Furdada. » 1495

SHARCI L. 57 ee 29 Agoosto 1981, Oggolaansho Heshiis dhexmaray JDS iyo Shirkado Faransiis ah oo Sameeya Mashruuca Sha'da Berbeera. » 1496

SHARCI L. 57 ee 2 Sebt. 1981, Meel Marin of Ratification. » 1498

LAW N. 57 on 2th Sept. 1981, Instrument Heshiis. » 1500

SHARCI L. 58 ee 6 Sebt. 1981, Meel Marin Heshiis. » 1502

LAW N. 58 on 6th Sept. 1981, Instrument of Ratification. » 1503

QAYBTA LABAAD

| | | |
|---|---|---|
| XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 47 ee 1da Oktoobar 1981, kharaj la xiriira Mardi gelinta Madaxweynaha | » | 1504 |
| XEER WADAXWAYNAHA JDS, —Lr. 48 ee 22 Luulyo 1981, Dhismaha Machadka C. Siyaasadda. | » | 1506 |
| XEER MADAXUEWNAHA JDS, Lr. 49 ee 10 Okt. 1981, Maalinta Halgamayaasha Qaranka Soomaaliyeed. | » | 1509 |
| XEER MADAXWEYNAHA JDS, Lr 50 ee 20 Sebt. 1981, Billad Qalin ah Hawlkarnimo Jaalle Xasan Xuseen Abkow. | » | 1511 |

# QAYBTA LABAAD

## SHARCI

SHARCI L. 52 Taariikh 11 LUL. 1981

Oggolaansho Dhaqangelin Heshiis Dhexmaray J.D.S. iyo Dawladda Jamhuuriyadda Jabuuti kuna Saabsan Isu celinta Dembiilayaasha.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo socda:

### Qodobka 1aad

1. Waxaa la Oggolaaday Meelmarinta Heshiiska dhexmaray J.D.S. iyo Dawladda Jamhuuriyadda Jabuuti kuna saabsan Isu celinta Dembiilayaasha
2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday Muqdisho taariikhdu markay ahayd 15 Abriile 1981.
3. Heshiisku Wuxuu ka mid noqonayaa sharcigan isagoo Lifaaq u ah.

### Qodobka 2aad

Shuruudaha iyo Xaaladaha ay qorayaan qodobada Heshiiska lagu soo tilmaamay Qod. 1aad ee Sharcigan waxey leeyihiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah sharciyada iyo Xeerarka Dalka, dhaqangelintiisuna waxaa la waafajinayaa Qod. 72 (1) ee Dastuurka iyo qodobada uu ka saameeyo Heshiiska.

### Qodobka 3aad

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaa awood loo siiyey in uu meel mariya Heshiiska sharcigan ku tilmaaman sida uu qabo qodobka 83aad ee Dastuurka J.D.S.

## Qodobka 4aad

Sharcigan wuxuu ka mid noqonayaa Sharciyada iyo Xeerarka Dalka, wuxuuna dhaqan gelayaa isla maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 11 Lulyo 1981

Madaxweynaha J.D.S.

(Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI L. 52 ee 26 Luuliyo 1981

MEELMARIN HESHIIS :

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY : Qod. 67aad xubintiisa 5aad, Qod. 82aad xubintiisa 4aad iyo Qod. 72aad xubintiisa 1aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Dimoqraadiga Soomaaliya.

ISAGOO ARKAY : Heshiiska isu-celinta Dembiilayaasha ee dhexmaray Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Dawladda Jamhuuriyadda Jabuuti, laguna kala saxeexday Muqdisho 15kii Abriil, 1981.

ISAGOO TIXGELINAAYA : Oggolaashaha Golaha Shacbiga Qaranka ee Heshiiska taariikhdiisuna ahayd 18kii Juun 1981.

Wuxuu soo saarayaa Xeerkan soo socda :

QODOBKA 1AAD

Heshiiska isu-celinta Dembiilayaasha ee dhexmaray Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Dawladda Jamhuuriyadda Jabuuti, laguna kala saxeexday Muqdisho 15kii Abriil, 1981 Waa la meelmariyey.

Qodobka 2aad

Heshiisku wuxu ku yeelan doonaa Jamhuuriadda Dimoqraadiga Soomaaliya astaan sharci ah wuxuuna u dhaqan galayaa sida waafaqsan Qodobkiisa 20aad.

Qodobka 3aad

Sharcigani wuxuu dhaqan geli doonaa taariikhda uu saxeexo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya; waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 26.7.81

MADAXWEYNAHA JDS

القانون رقم ٥٢ الصادر فى ٢٦ ــ ٧ ــ ١٩٨١
وثيقـــة التصـــــديق

جمهورية الصومال الديمقراطية

الرئيـــــــس

بعد الاطلاع : على المادة ٦٧ الفقرة الخامسة ، المادة ٨٢ الفقرة الرابعة والمادة ٧٢ الفقرة الاولى من دستور جمهـــورية الصومـــال الديمقراطية.

بعـــد الاطلاع : على اتفاقبة تبادل المجرمين المبرمة بين حكومة جمهورية الصومال الديمقراطية وحكومة جمهورية جيبوتى ، الموقع عليها فى مقديشو بتاريخ ١٥ أبريل ١٩٨١م.

بعـــد الاطلاع : على موافقة مجلس الشعب على هذه الاتفاقية بتاريخ ١٨ يونيو ١٩٨١م.

يصـــدر المرســـوم التالى

المـــادة الاولى

تم التصديق على اتفاقية تبادل المجرمين المبرمة بين حكومة جمهورية الصومال الديمقراطية وحكومة جمهورية جيبوتى الموقع عليها فى مقديشو بتاريخ ١٥ ابريل ١٩٨١م.

المـــادة الثانيـــة

تكون الاتفاقية قوة القانون في جمهورية الصومال الديمقراطية طبقا للمـــادة العشرين من الاتفاقية.

المـــادة الثالثـــة

ينفذ هذا المرسوم حال توقيعه من قبل رئيس جمهورية الصومال الديمقراطية وينشر في الجريدة الرسمية للدولة.

مقديشو ٢٦ يوليو ١٩٨١م

اللواء محمد سياد برى

رئيس جمهورية الصومال الديمقراطية

Sharci lambar 53, taariikh 15 Luuliyo 1981 oggolaasho heshiisyo dhexmaray JDS iyo dhowr Banki iyo Shrikadda Technipetrol, saameeyana amaah lacageed iyo dhismo Warshadda Bacrinta Beeraha.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA : Oggolaashaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda :

QODOBKA 1AAD

1) Waxaa la oggolaaday meelmarinta heshiiska amaaheed dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Hay'adaha kala ah: Sharikadda Maalgelinta Batroolka Carbeed, Bankiga Baariiji ee Des Pays-Bas, Bankiga Lyonnais, Sharikadda Guud, Banki ga Xadeysan ee Carabta, Bankiga Faransiiska ee Ganacsiag Dibadda iyo heshiiska dhexmaray Was. Qor. Q. ee Jam. Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Sharikadda Technipetrol oo ku saabsan dhismo Warshadda Bacrinta Beeraha.

2) Heshiisyada waxaa lagu kala saxiixday magaaalada Muqdishu marka ay taariikhdu ahayd 8 Jennaayo 1981 iyo 27 setember 1980.

3) Heshiisyada waxay ka mid noqonayaan Sharcigan iyagoo lifaaq u ah.

QODOBKA 2AAD

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan heshiisyada lagu soo tilmaamay Qod. 1aad ee Sharcigan, waxay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah Sharciyada iyo Xeerarka Dalka, waxaana dhaqangelintooda la waafajinayaa Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo qodobbada uu ka saameeyo Heshiisyada.

QODOBKA 3AAD

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaa awood loo siiyey in uu meelmariyo heshiisyada Sharcigan lagu soo tilmaamay.

QODOBKA 4AAD

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda

Muqdisho, 15.7.1981

MADAXWEYNAHA J. D. S.

Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI L. 53 ee 26 Luuliyo 1981

MEELMARIN HESHIIS :

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY : Qod 67aad xubintiisa 5aad, Qod. 82aad xubintiisa 4aad iyo Qod. 72aad xubintiisa 1aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

ISAGOO ARKAY : Heshiiska Amaahda ee lagu kala saxeexday Muqdisho 8dii Janaayo, 1981, dhexmarayna Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Bangiyadda soo socda :

— Arab Petroleum Investment Corp.

— Banque de paris et des Pays-Bas:

— Credit Lyonnais:

— Societe Generale:

— Arab Bank Limited:

— Bangue Commerciale Paur L'Europe du Nord:

— Banque Francais le Commerce Exterieur:

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Golaha Shacbiga Qaranka ee Heshiiska aan soo sheegnay taariikhdiisuna ahayd 12kii Luulyo 1981.

Wuxuu soo saarayaa Xeerkan soo socda:—

Qodobka 1aad

Heshiiska Amaahda ee lagu kala saxeexdo Magaalada Muqdisho, 8dii Janaayo, 1981, dhexmarayna Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Bangiyada Hoos ku qoran:

Arab Petroleum Investment Corp., Banque de Paris et des Pays-Bas, Credit Lyonnais, Societe Generale, Arab Bank Limited, Banque Commerciale Pour L'Europe du Nord, Banque Pour le Commarca Exter, waa la meelmariyey.

## QODOBKA 2AAD

Heshiiskanu wuxuu ku yeelan doonaa Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya astaan sharci ah.

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa markuu saxeexo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya; waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee dawladda.

Muqdisho, 26. 7. 1981

S/GAAS MAXAMED SIYAAD BARRE

MADAXWEYNAHA JDS

Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya

LAW No. 53 on 26th July 1981.

Instrument of Ratification.

THE PRESIDENT OF THE SDR

HAVING SEEN: Article 67 para 5, Article 82 para 4 and Article 72 para 1 of the Constitution of the Somali Democratic Republic.

HAVING SEEN: The Loan Agreement concluded at Mogadishu on 8th January 1981, between the Government of the Somali Democratic Republic and the following Banks:

— Arab Petroleum Investment Corp.
— Banque de Paris et des Pays-Bas,
— Credit Lyonnais,
— Societé Generale,
— Arab Bank Limited,
— Banque Cormmerciale pour l'Europe du Nord,
— Banque Francais pour le Commerce Exterieur.

TAGING NOTE: Of the approval of the People's Assembly of thè said Agreement dated 12th July 1981.

Hereby promulgates the following Decree:

Article 1

The Loan Agreement concluded at Mogadishu on 8th January 1981, between the Government of the Somali Democratic Republic and the following Banks:

Arab Petroleum Investment Corp., Banque de Paris et des Pays-Bas, Credit Lyonnais, Societè Generale, Arab Bank Limited, Banque Commerciale pour L'Europe du Nord, Banque pour le Commerce Exterieur, is hereby ratified.

Article 2

This Agreement shall have the force of law in the territory of the Somali Democratic Republic;

This Decree shall enter into force upon signature by the President of the Somali Democratic Republic; and shall be published in the Official Bulletin of the State.

Mogadishu, 26.7.1981.

Major General Mohamed Siad Barre
President of the

SHARCI L. 54 ee 15 Luuliyo 1981 Oggolaasho dhaqangelinta heshiis saaxiibnimo iyo wax wada qabsi oo dhexmaray Dawladda J. D. S. iyo Dawladda Jamhuuriyadda Jabuuti :

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA : Oggolaashaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda :

QODOBKA 1AAD

1) Waxaa la oggolaaday meelmarinta heshiiska dhexmaray J. D. S. iyo Dawladda Jamhuuriyadda Jabuuti kuna saabsan saaxiibtinimo iyo wax wada qabsiga labada Dal.

2) Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday Muqdisho taariikhdu markay ahayd 15 Abriil 1981.

3) Heshiisku wuxuu ka mid noqonayaa sharcigan isagoo lifaaq u ah.

QODOBKA 2AAD

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan qodobada heshiiska lagu soo tilmaamay qod. 1aad ee sharcigan, waxay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah sharcigan, waxay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah sharciyada iyo xeerarka Dalka, dhaqan gelintiisu waxaa la waafajinayaa Qod. 72 (1) ee Dastuurka iyo qodobada uu ka saameeyo Heshiiska.

QODOBKA 3AAD

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaa awood loo siiyey in uu meel mariyo heshiiska sharcigan ku tilmaaman sida uu qabo qodobka 82aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraa-

QODOBKA 4AAD

Sharcigan wuxuu ka mid noqonayaa sharciyada iyo xeerarka Dalka, wuxuuna dhaqan galayaa isla maalinta lagu soo saaro faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho 15 Luuliyo 1981

MADAXWEYNAHA J. D. S.

(Maxamd Siyaad Barre)

SHARCI L. 54 ee 26 Luulyo 1981, Meel marin Heshiis:

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 67aad xubintiisa 5aad, Qod. 82aad xubintiisa 4aad iyo Qod. 72aad xubintiisa 1aad ee Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Heshiiska Saaxibtinimo iyo Iskaashi ee dhexmaray Dawladda JDS iyo Dawladda Jam. Jabuuti laguna kala saxiixday Muqdisho 15kii Abriil 1981;

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga Qaranka ee Heshiiska taariikhdiisuna ahayd 18kii Juun 1981.

WUXUU SOO SAARAYAA

Shareiga soo socda:

Qod. 1aad

Heshiiska Saaxibtinimo iyo Iskaashi ee dhexmaray dawladda JDS iyo Dawladda Jam. Jabuuti laguna kala saxeexday Muqdisho 15kii Abriil, 1981, WAA LA MEELMARIYEY.

Qod. 2aad

Heshiisku wuxuu ku yeelan doonaa JDS astaan sharci ah wuxuuna u dhaqan geli doonaa sida waafaqsan qodobkiisa 9aad.

Qod. 3aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa markuu saxeexo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 26.7.1981

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

القانون رقم ٥٤ الصادر في ٢٦ — ٧ — ١٩٨١
وثيقة التصديق

## جمهورية الصومال الديمقراطية

## الرئيس

بعد الاطلاع :على المادة ٦٧ الفقرة الخامسة ، المادة ٨٢ الفقرة الرابعة والمادة ٧٢ الفقرة الاولى من دستور جمهورية الصومال الديمقراطية.

بعد الاطلاع: على معاهدة الصداقة والتعاون المبرمة بين حكومة جمهورية الصومال الديمقراطية وحكومة جيبوتى الموقع عليها فى مقديشو بتاريخ ١٥ أبريل ١٩٨١م.

بعد الاطلاع :على موافقة مجس الشعب على هذه المعاهدة بتاريخ ١٨ يونيو ١٩٨١م.

يصدر المرسوم التالى

### المادة الاولى

تم التصديق على معاهدة الصداقة والتعاون المبرمة بين حكومة جمهورية الصومال الديمقراطية وحكومة جمهورية جيبوتى الموقع عليها في مقديشو بتاريخ ١٥ أبريل ١٩٨١م.

### المادة الثانية

تكون للمعاهدة قوة القانون في جمهورية الصومال الديمقراطية طبقا للمادة التاسعة من المعاهدة.

### المادة الثالثة

ينفذ هذا المرسوم حال توقيعه من قبل رئيس جمهورية الصومال الديمقراطية وينشر في الجريدة الرسمية للدولة .

مقديشو ٢٦ يوليو ١٩٨١م.

اللواء محمد سياد برى

رئيس جمهرية الصومال الديمقراطية

Sharci lambar 55 taariikh 18 Agosto 1981, Oggolaansho Axdiga iyo ka mid noqoshada Hay'adda Damaanadda Maalgelinta Carbeed.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday meelmarinta Axdiga iyo ka mid noqoshada Ururka Damaanadda Maalgelinta Carbeed oo ay xaruunteedu tahay Kuweyd.
2. Xadidaadda saamiga ka mid noqoshada Ururka waxaa awood loo siiyey Wasaaradda Maaliyadda.
3. Axdiga Ururka Damaanadda Maalgelinta Carbeed wuxuu ka mid noqonayaa sharcigan isagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan Axdiga waxay leeyinhiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah sharciyada iyo xeerarka Dalka, waxaana dhaqangelintoodu la waafajinayaa Dastuurka JDS.

Qod. 3aad

Madaxweynaa JDS waxaa awood loo siiyey in uu meel mariyo Axdiga Ururka oo ku tilmaaman sharcigan, sida uu qabo qod. 82aad ee Dastuurka JDS.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu ka mid noqonayaa sharciyada iyo xeerarka Dalka, wuxuuna dhaqan-gelayaa isla maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 18 Agoosto 1981

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI L. 55 ee 6 Sebtam. 1981, Meel marin Heshiis:

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 67aad xubintiisa 5aad, Qod. 82aad xubintiisa 4aad iyo Qod. 72aad xubintiisa 1aad ee Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Heshiiska lagu abuuray Shariikadda Damaanadda Maalgelinta Carbeed, dhaqan galkiisuna ahaa 1dii Abriil, 1974 iyo isbeddelkii ka dambeeyey;

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga Qaranka ee Heshiiska taariikhdiisuna ahayd 18kii Ogosto, 1981.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Dawladda JDS waxay meelmarisay Heshiiska lagu abuuray Shirkadda Damaanadda Maalgelinta Carbeed dhaqan galkiisuna ahaa 1dii Abriil, 1974 iyo isbeddelkii ka dambeeyey.

Qod. 2aad

Heshiiskani wuxuu ku yeelanayaa JDS astaan sharci ah, wuxuuna u dhaqan geli doonaa sida waafaqsan qodobkiisa 45aad.

Qod. 3aad

Sharcigani wuxuu dhaqan geli doonaa markuu saxeexo Madaxweynaha JDS; waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho,6.9.1981

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

القانون رقم ٥٥ الصادر في ٦ – ٩ – ١٩٨١
وثيقة التصديق

جمهورية الصومال الديمقراطية

الرئيس

بعد الاطلاع: على ٦٧ الفقرة الخامسة ، والمادة ٨٢ الفقرة الرابعة والمادة ٧٢ الفقرة الاولى من دستور جمهورية الصومال الديمقراطية.

وبعد الاطلاع: على اتفاقية انشاء المؤسسة العربية لضمان الاستثمار التى دخلت حيز النفاذ اعتبارا من أول ابريل ١٩٧٤م مع تعديلاتها.

وبعد الاطلاع: على موافقة مجلس الشعب على هذه الاتفاقية بتاريخ ١٨ اغسطس ١٩٨١م.

يصدر المرسوم التالى

المادة الاولى

تم التصديق على اتفاقية انشاء المؤسسة العربية لضمان الاستثمار التى دخلت حيز النفاذ اعتبارا من أول ابريل ١٩٧٤م مع تعديلاتها.

المادة الثانية

تكون للاتفاقية قوة القانون في جمهورية الصومال الديمقراطية طبقا للمادة الخامسة والاربعين.

المادة الثالثة

ينفذ هذا المرسوم حال توقيعه من قبل رئيس جمهورية الصومال الديمقراطية وينشر فى الجريدة الرسمية للدولة.
حرر في ٦ سبتمبر ١٩٨١م.

اللواء محمد سياد برى

رئيس جمهورية الصومال الديمقراطية

SHARCI L. 56 ee 27 Agoosto 1981, U rogid Sharci Xeerka Sharciga L. 46 ee 30 Juunyo 1981, kuna saabsan dib u habeynta qaabka Tariifada Furdada iyo wax ku kordhin Canshuurta Furdada:

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa loo rogay Sharci xeerka sharci lambar 46 ee 30 Juunyo 1981 oo ku saabsan dib u habeynta qaabka dhismaha tacriifada furdada iyo wax ku kordhin canshuuraha furdada.

Qod. 2aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 27 Agoosto 1981

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI L. 57 Taariikh 29 Agoosto 1981, Oggolaansho Heshiis Dhexmaray JDS iyo Sharikado Faransiis ah oo sameeya Mashruuca Shamiintada Berbera:

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday meel-marinta heshiiska dhexmaray JDS iyo Hay'adaha kala ah: Bankiga Dhexe ee Iskaashiga Dhaqaalaha ee Faransiiska, Sharikadda LAFARGE ee la Talinta iyo Sharikadda Dhismaha «Creusot Loire Entreprises» oo saameeya maalgelinta, la talinta iyo dhismaha Mashruuca Shamiintada Berbera.

2. Heshiisyada wax aala kala saxiixday taariikhdu markay ahayd 29.4.1981 iyo midka la kala saxiixan doono tr. 8.8.1981.

3. Saddexda heshiis waxay ka mid noqonayaan sharcigan iyagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan saddexda heshiis ee lagu soo tilmaamay Qod. 1aad ee Sharcigan, waxay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah sharciyada iyo xeerarka Dalka, waxaana dhaqangelintooda la waafajinayaa Dastuurka JDS iyo qodobbada uu ka saameeyo ee heshiisyada.

Qod. 3aad

Madaxweynaha JDS waxaa awood loo siiyey in uu meel-mariyo heshiisyada sharcigan lagu soo tilmaamay.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 29 Agoosto 1981

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI L. 57 ee 2 Sebt. 1981, Meelmarin Heshiis:

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 67aad xubintiisa 5aad, Qod. 82aad xubintiisa 4aad iyo Qod. 72aad xubintiisa 1aad ee Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Heshiiska Amaahda ee Maalgelinta Mashruuca Dhismaha Warshadda Shamiitada Berbera ee dhexmaray Dawladda JDS iyo Bankiga CAISSE CENTRALE DE COOPERATION ECONOMOCUE lana kala saxiixday 8dii Ogosto, 1981;

— Heshiiska La-talinta ee Mashruuca Shamiitada Berbera dhexmarayna Dawladda JDS iyo Shariikadaha LAFARGE CONSEILS ET ETUDES lana kala saxiixday 29kii Abriil, 1981;

— Heshiiska Dhismaha Mashruuca Shamiitada Berbera ee dhexmaray Dawladda JDS iyo CREUSOT LOIRE ENTREPRISES lana kala saxiixday 29kii Abriil, 1981;

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga Qaranka ee Heshiisyada aan soo sheegnay taariikhdiisuna ahayd 29kii Ogosto 1981.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Dawladda JDS waxay meelmarisay Heshiisyada soo socda:

— Heshiiska Amaahda ee Maalgelinta Mashruuca Dhismaha Warshadda Shamiitada BERBERA ee dhexmaray Dawladda JDS iyo Bankiga CAISSE CENTRALE DE COOPERATION ECONOMIQUE, lana kala saxiixday 8.8.1981;

— Heshiiska La-talinta ee Mashruuca Dhismaha Warshadda Shamiitada BERBERA ee dhexmaray Dawladda JDS iyo Shariikadaha LAFARGE CONSEILS ET ETUDES lana kala saxiixday 29.4.1981;

— Heshiiska Dhismaha Mashruuca Warshadda BERBERA ee dhexmaray Dawladda JDS iyo CREUSOT LOIRE ENTREPRISES lana kala saxiixday 29.4.1981.

Qod. 2aad

Heshiisyadani waxay ku yeelanayaan JDS astaan sharci ah; waxayna dhaqan geli doonaan markuu saxiixo Madaxweynaha JDS.

Qod. 3aad

Sharcigan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 2dii Sebtembar, 1981

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

LAW No. 57 on 2th September 1981, Instrument of Ratification:

THE PRESIDENT SDR

HAVING SEEN: Article 67 pare 5, Article 82 para 4 and Article 72 para 1 of the Conetitution of the Somali Democratic Republic;

HAVING SEEN: The Loan Agreement for the financing project of Berbera Cement Piant between the Government of the SDR and the CAISSE CENTRALE DE COOPERATION ECONOMIQUE, sinsged on 8th August, 1981;

— The Contract of Engineering Consultancy for the Berbera Cement plant between the Government of theSDR and the LAFANGE CON SEILS ET ETUDES, signed on 29th April, 1981;
and

TAKING NOTE: Of the approval of the People's Assembly of the said Agreement and Contract dated 29th August, 1981.

Hereby promulgates the following Decree:

Article I

The Government of the SDR hereby ratifies:- the ioan Areement for the financing project of BERBERA Coment plant concluded batween the Government of the SDR and the CAISSE CENTRALE DE COOPRATION ECONOMICQUE, signed on 8.8.1981;

— The Contract of Engineering Consultancy for the BERBERA Cement plant concluded batween the government of the SDR and the LAFARGE CONSEILS ET ETUDES, signed on 29.4.1981;

— The Contract for the Construction project of BERBERA Cement plant concluded between the Government of the SDR and the CREUSOT LOIRE ENTREPRISES, singed on 29.4.1981.

Article II

The above Agreement & Contracts shall have the force of law in the Territory of the SDR and enter into force upon singature by the President of the SDR.

This Decree shall be published in the Official Bulletin of the State.

Mogadishu, Sebtember 2.1981.

PRESIDENT OF THE SDR

(Mohamed Siad Barre)

SHARCI L. 58 ee 6 Sebt. 1981, Meelmarin Heshiis:

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 67aad xubintiisa 5aad, Qod. 82aad xubintiisa 4aad iyo Qod. 72aad xubintiisa 1aad ee Daotuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Heshiiska Dhaqanka ee dhexmaray Dawladda JDS iyo Dawladda Islaamka ah ee Bakistaan, laguna kala saxiixday Muqdisho, 29kii Sebtember, 1980;

ISAGOO TIXGELINAAYA: oggolaanshaha Golaha Shacbiga Qaranka ee Heshiiska taariikhdiisuna tahay 7dii Maajo, 1981.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Heshiiska Dhaqanka ee dhexmaray dawladda JDS iyo dawladda Islaamka ah ee Bakistaan, laguna kala saxiixday Muqdisho, 29kii Sebt. 1980, WAA LA MEELMARIYEY.

Qod. 2aad

Heshiiskani wuxuu yeelanayaa JDS astaan sharci ah, wuxuuna u dhaqan geli doonaa sida waafaqsan qodobkiisa 8aad.

Qod. 3aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa markuu saxiixo Madaxweynaha JDS; waxaana lagu soo saari doonaa mmarra hht rradidoluunuo dd hohth rrounuodahtror Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 6.9.1981.

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

LAW No. 58 on 6th September 1981, Instrument of Rafication:

THE PRESIDENT SDR

HAVING SEEN: Article 67 para 5, Article 82 para 4 and Article 72 para 1 of the Constitution of the Somali Democratic Republic;

HAVING SEEN: Cultural Agreement between the Government of the SDR and the Government of the Islmeic Republic of Pakistan, singed at Mogadishu on 29th Septembar, 1980;

TAKING NOTE: Of the approval People's Assembly of the said Agreement dated 7th May, 1981.

Hereby promulgates the following Law:-

Article I

The Cultural Agreement between the Government of the SDR and the Government of the Islamic Republic Pakistan, singed at Mogadishu on 29th September, 1980, is hereby ratified.

Article II

This Agreement shall have the force of law in the territory of the SDR in accordance with its Article 8.

Article III

This Law shall enter into force upon signature by the President of the SDR and shall be published in the Official Bulletin of the State.

Mogadishu, 6.9.1981.

PRESIDENT OF THE SDR

Mohamed Siad Barre

**XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 47 ee 1da Okt. 1981,** Kharaj la xiriira Mardi gelinta Madaxtooyada.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 82aad Xubintiisa 14aad ee Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Baahida loo qabo in wax lagu kordhiyo Sigaarka iyo Tarraqa loogu tala galay in la siiyo martida booqasho rasmi ah ugu timaada Madaxtooyada JDS;

ISAGOO TIXGELINAYA: Talada Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda;

WUXUU XEERAYAA

Qod. 1aad

Marka laga billaabo 1da Oktoobar 1981 Moonoboo-lyada Sigaarka iyo Tarraqu waxay ugu tala geli doonaan martida u timaada Madaxtooyada J.D.S. Sigaar hadiyo ah oo dhan Kg. 10 (Toban) bil kasta;

Qod 2aad

Monoboolyada sigaarka iyo tarraqa waxa kale oo ay ugu tala geli doontaa wafdi kasta ee heer Dawladeed ah oo Dalka booqasho ku yimaada kuna soo dega Madaxtooyada JDS, Sigaar hadiyo ah oo dhan Kg. 3 (Seddex) amase cadaddii si lama filaan ah loogu baahdo;

Qod. 3aad

Agaasimaha Guud ee Maamulka Lacagta Madaxtooyada JDS, ayaa loo xilsaaray wixii la xiriira maamulka codsiga iyo ballanqaadka ku saabsan Sigaarka kor lag usoo tilmaamay.

Muqdisho, 1 Oktoobar 1981

Madaxweynaha J. D. S.

(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda

(Jaalle Cabdullaahi Axmed Caddow)

Waan aragnay ee Diiwaangelinay;

Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 83;

Muqdisho, 10 Oktoobar 1981;

Hantidhawraha Guud;

Dr. Xuseen Cabdulle Cali.

## QAYBTA KOWAAD

## XEER

XEERKA MADAXWEYNAHA JDS, L. 47 taariikh 22 Luulyo 1981, Dhismaha Machadka Culuunta Siyaasadda:

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka,

MAKUU ARKAY: Go'aanka Golaha Dhexe ee Xisbi ga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed ee la gu guddoomiyey in la dhiso Machadka Culuunta Siyaasadda,

MARKUU ARKAY: In loo baahan yahay in Machad kaCuluunta Siyaasaddu, isagoo ka mid noqonaya Kulliyadaha Jaamacadda Ummadda, uu yeesho maamul u gaar ah oo hoos yimaada Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaali yeed;

MARKUU ARKAY: Dhegeystana talada Wasiirka Hid daha iyo Tacliinta Sare (Warqad Lambar WHTS/ QAR.10.63,taariikh 14.4.1981;

WUXUU SOO SARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

(Dhismaha Machadka)

1. Waxaa la dhisay Machadka Culuunta Siyaasadda oo ka mid noqonaya Kuliyadaha Jaamacadda Um madda Soomaaliyeed.
2. Machadku waa Hay'adda ugu sarreysa ee Waxba rashada Culuunta Siyaasadda, Wuxuuna yeelana yaa maamul u gaar ah oo hoos imanaya Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soo maaliyeed.

Qod. 2aad

(Ujeeddo)

Ujeeddada Machadku waxay tahay soo saaridda Kaadirka Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaali yeed, Ururrada Bulshada iyo kuwa Dawladda.

Qod. 3aad

(Qaybaha Waxbarashada)

1. Machadku, Qaybta Jaamacadda ka sokow, Wuxuu yeelan karaa qaybo kaloo Waxbarasho oo ka hoo seeya heerka Jaamacadda.

2. Shahaadooyinka laga bixiyo qaybta Jaamacadda ee Machadka waxay la qiimo yihiin Shahaadooyin ka Kulliyadaha Jaamacadda.

3. Shahaadooyinka kale waxay la qiimo noqonayaan heerarka ay u dhigmaan ee nidaamka Waxbarasha da Dalka.

Qod. 4aad

(Aqoonsi)

Shahaadooyinka Machadka uu hore u bixiyey, Aqoonsigooda iyo heerarkooda waxaa la waafajinayaa Xeerkan.

Qod. 5aad

(Xuquuqda Barayaasha)

Borfasoorada, Barayaasha Sare, Barayaasha, Bare—kaaliyeyaasha waqti buuxa iyo kuwa waqti dhiman waxay la xuquuq yihiin kuwa Laamaha kale ee Jaama cadda, waxaana lagu dhaqayaa Sharciga Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed.

### Qod. 6aad

### (Xeer Hoosaad)

Habka dejinta barnaamijyada Akadeemikada iyo kuwa kale ee Machadka, xiriirka Machadka iyo Gud doonka Jaamacadda, awoodda Golaha Dhexe XHKS uu ku yeelanayo Hoggaaminta Siyaasadda Waxbarashada Machdka iyo Xulka ardada, waxaa nadaaminaya Xee Hoosaad gaar ah uu soo saaro Madaxweynaha JDS, isa goo dhegeystay Guddoomiyaha Hoggaanka Cilmi Baa rista iyo Aydolojiyada ee Xisbiga iyo Wasiirka Wasaa radda Hiddaha iyo Tacliinta Sare.

### Qod. 7aad

### (Dhaqangal)

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS. Wuxaana lagu soo saarayaa Faa finta Rasmiga ah.—

Muqdisho, 22 Luulyo 1981

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(Maxamed Siyaad Barre)

WASIIRKA MAALIYADDA

(Cabdullaahi Axmed Caddow)

XEERKA MADAXWEYNAHA JDS, L. 49 ee 10 Okt. 81, Maalinta Halgamayaasha Gobonnimodoonka Qaranka Soomaaliyeed:

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU TIXGELIYEY: Halgankii dheeraa ee Ummadda Soomaaliyeed ay u soo gashay xaqiijinta madaxbannaanida iyo gobannimada Qaranka Soomaaliyeed;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in la xafido, la baahiyo, loo tebiyo FACA cusub iyo kuwa soo socda taariikhda halgankii adkaa ee Dadweynha Soomaaliyeed, meel kastoo ay ku noolaayeenba, ay u soo galeen xorriyadda maanta ay hoos harsanayaan qaybo ka mid ah Ummadweynta Soomaaliyeed oo Isticmaarku kala qaybiyey, laguna barbaariyo WADDANJACAYLKA, XURMADA, QARANNIMADA, iyo HANASHADA guulihii ay Aabbayaashood sida nafhurnimada leh ku soo hooyeen;

MARKUU ARKAY: In ay dow tahay in sannad kasta si gaar ah loo maamuuso taariikhdaas, maalin go'anna loo xadido;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay mudan tahay in maalintaas lagu beego maalintii ugu horreysay ee la arkay Calanka Qaranka Soomaaliyeed.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

12ka Oktoobar ee sannadkasta oo ku beegan maalinta loo dabbaaldego Calanka Soomaaliyeed, waxaa loo aqoonsanayaa MAALINTII HALGAMAYAASHA QARANKA SOOMAALIYEEY.

Qod. 2aad

1. Taariikhda kor ku tilmaaman waxaa laga xusayaa Dalka JDS oo dhan.

2. Wargeysyada, Idaacadaha iyo qalabka warfaafinta ee Dawladda, Golayaasha Hanuuninta ee Degmooyinka iyo kuwa goobaha shaqada, waxaa laga faafinayaa, loogana hadlayaa barnaamijyo gaar ah oo munaasabaddaas la xiriira.

3. Abaabulka barnaamijyadaas waxaa ka xil saaran Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed, isagoo adeegsanaya Hay'adaha Dawladda ee ku shaqada leh iyo Ururrada Bulshada.

Qod. 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqaan gelayaa laga billaabo 6da Oktoobar 1981, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 6.10.1981

MADAXWEYNAHA JDS.

(Maxamed Siyaad Barre)

**XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 50 ee 20 Sebt. 1981: Billad Qalin ah oo Hawlkarnimo: J/le Xasan Xuseen Abkow.**

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lambar 65 ee 19 Okt. 1970, Habka Abaalmarinta Qaranka;

MARKUU TIXGELIYEY: Doorkii qaddarinta iyo aqoonsiga mudnaa ee J/le Xasan Xuseen Abkow uu ka qaatay dhismaha Mashruuca Waraabinta Balcad, kuna muujiyey Kacaannimo, Hawlkarnimo iyo firfircooni dheeraad ah xagga hoggaaminta shaqaalaha iyo toosinta mishiinka Mashruuca;

MARKUU TIXGELIYEY: Lagama maarmaan in ay tahay in la siiyo Khabiirkaas aqoonsiga uu ka mudan yahay Qaranka ee ku aaddan hirgelinta dhismaha biya xireenka iyo hawlaha kale oo dheeraadka ah ee Degmadaas uu kaga fuliyey fikrad ku saleysan iskaa wax u qabso;

MARKUU DHEGEYSTAY: Talada Guddiga Abaalmarinta Qaranka.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qodob Keliya

Waxaa lagu maamuusay BILLAD QALIN AH OO HAWLKARNIMO J/le XASAN XUSEEN ABKOW.

Muqdisho, 20.9.81

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)